

# Macluumaad Soomaali ku qoran

Guddiga Doorashada Queensland (Electoral Commission of Queensland, ECQ) waxay qabtaan doorashada Dawlad Goboleedka, dawladaaha hoose iyo doorashooyinka ururada ee Queensland.

Doorashada dawlada hoose ee soo socota waxaa la qabanayaa 28da Maarso 2020.

Doorashada dawlad goboleedka waxaa la qabanayaa 31ka Oktoobar 2020.

## Ma isku qoraayaa?

Waa khasab inaad is qorto codkana ka bixiso dawlada hoose, doorashooyinka dawlad goboleedka, iyo Dawlada Federaalka haddii aad:

- tahay muwaadin Australian ama qof Ingiriis ah oo xaq u leh
- da'daadu jirto 18 sanadood ama ka weyn, aadna
- ku noolayd cinwaankaaga ugu yaraan hal bil.

Intaas waxaa wehelisa, qofka jira 16 iyo 17 sanadood waxaa inay is qoraan waxayna helli doonaan xuquuqda codbixinta markay gaaraan 18 sanadood.

## Sida la isu qoro

Waxaad awoodaa inaad is qorto adiga oo buuxinaya [foomka isqorida oo Ingiriis](#) ku qoran ama [website](#)-ka online-ka ah ee Guddiga Codbixinta Australia.

## Sidee codka uga bixiyaa doorashada?

Waxaa jira siyaalla badan oo aad codkaaga u bixin karto, xataa haddaad dibada ku maqan tahay maalinta codbixinta. Taas waxaa ka mid ah horay u sii codbixinta (sii-codaynta), ka codaynta goobta maalinta codbixinta, boosta ku dirida ama cod ku bixinta telefoonka kuwa xaq u leh.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan codbixinta Queensland ayaa laga hellaa Tusaha Codbixinta ee Luqadaha badan ([Multilingual Voting Guide](#))

## Ma u baahan tahay mutarjum?

Haddii aad doonayso macluumaad intaas ka badan, waxaad la xiriiri kartaa Guddiga Doorashada Queensland (ECQ) iyada oo mutarjum ku caawimayo, ama telefoon u dir (07) 30821424.

## Nala soo xiriir

Xafiiska Guddiga Doorashada Queensland (ECQ) wuxuu ku yaallaa Level 20, 1 Eagle Street, Brisbane QLD 4000.

Waxaad ka wici kartaa Guddiga Doorashada Queensland (ECQ) tel: 1300 881 665, ama u dir email [ecq@ecq.qld.gov.au](mailto:ecq@ecq.qld.gov.au) ama fakis u dir (07) 3036 5776.

Haddii aad joogto wadanka dibadiisa, naga soo wac +617 3035 8103.